SOMALI

## Adeegyada RIKUs adiga ayaa laguugu talo galay haddii

- Aad tahay ama ka shakisantahay inaad tahay dhibane dembi
- Ehelkaada kugu dhaw ay noqdeen dhibane dembi
- Aad tahay markhaati dembi
- Aad rabtid inaad ka hadasho waayo araganimadaada iyo/ama aad hesho la talin waxkuool ah
- Aad tahay xirfadle kaas oo u baahan talo si aad u taageerto macmiilkaaga

Ne puteţicontactaprintelefonsau online – de asemenea, anonim. De asemenea, puteţisolicita o întânirefaţăînfaţăînunuldintrebirourilenoastre.

RIKU ma aha haya'addowli ah, laakiin NGO aan laheyn xiriir siyaasadeed ama diimeed. RIKU waxay si qarsoodi ah u taageertaa dhibanayaasha dembiga.

**Warbixintaada lama siinayo qof walba ogolaanshahaaga la'aantiisa.**

## Adeegyada RIKU sidoo kale waa dhibanayaasha si xun loola dhaqmay ama ka ganacsiga dadka

• Miyuu qof (tusaale ahaan qaraabo la tahay, badrooniga, xaaska) kugu xukumaa dhaqdhaqaaqaaga ama xiriirkaada ee dadka kale? • Miyaa laguu sheegay inaad qabtid lacag oo imaanshaha Finland? • Miyaad ka baqeysaa inay wax xun kugu dhacaan ama qof adiga kugu dhow haddii aad ku qilaafto badroonigaada? • Ma bilaash ayaad ku shaqeysaa ama mushaarka aad ka heshid shaqadaada aad u yartahay oo aadan iska bixin Karin qaarshaadka daruuriga nolosha? • Miyaa lagaa balan qaaday mushaar ka sareeyo midka aad dhabtii heshid? • Ma inaad shaqeysaa in kabadan 10 saacadood ku dhawaad maalin walba? • Miyaa laguu balan qaaday shaqo ka duwan mida aad sameysid? • Miyuu qof kuu sheegay in lagaa musaafurinayo Finland ama aad weyneysid ruqsada daganaanshahaaga? • Miyuu jiraa qof kugu cadaadinayo inaad sameysid wax dambi ah ama wax kale oo aadan rabini naad sameysid? • Miyaad ka baqeysaa inaad ka hadashid xaaladaada?

Haddii adiga ama qof aad taqaanid uu la kulmay mid ka mid ah waxyaabahaan, la xiriir xafiiskaaga RIKU ee kuu dhow ama i-meel u soo dir **help@riku.fi**. Wacitaanada oo dhan iyo i-meelada waxaa loola dhaqmaa si qarsoodi ah oo looma gudbinayo qofkale ogolaanshahaaga la'aantiisa.

RIKU

RIKOSUHRIPÄIVYSTYS

Taageerada Dhibbanaha Finland (RIKU) waxay Jaheysaa iyo taageertaa dhibanayaasha dembiyada, ehaladooda u dhaw iyo markhaatiyasaha dambiga

TELEEFOON

ONLEENKA

FOOL KA FOOL

## TELEEFOON AHAAN

**Khadka Caawinta Qaranka**
(inta badan Finnishka)
**116006**
Isniin-Talaadada 1 PM to 9 PM iyo
Arboco-Jimaha 5 PM illaa 9 PM

**Khadka Talo bixinta Sharciga**
(Finnish)
**0800-161177**
Isniinta-Khamiista 5 PM illaa 7 PM

**Xafiisyada RIKU**
Xafiisyada u dhaw Finland waxay bixiyaan taageero iyo adeegyo latalin ah. Ka Fiiri macluumadkooda cinwaanka **www.riku.fi**

## ONLEENKA

**RIKUchat** waa adeeg sheekeysi halkaas oo aad ku weydiin kartid su'aalaha waqti dhab ah (inta badan af Finnish). Waad dooran kartaa inaad qarsoodi ahaatid. Waxaad ka heli kartaa sheekeysiga **www.riku.fi**.

Bogga RIKUs wuxuu bixiyaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan RIKU iyo nidaamka dembiyada. Macluumaadka aasaasiga ah waxay kujiran 20 luqadood oo kala duwan.

/rikosuhripaivystys @rikosuhrit

## ADEEGA SHAQSIGA EE XAFIISYADEENA

Xafiisyada RIKU ee agagaarka Finland waxay ku siiyaan taageero dhibanayaasha iyomarqaatiyada dambiga **si bilaash ah**. Waxaan marwalba isticmaali karnaa turjubaan aamin ah eek u saleysan qarsoodiga adag. Waxaad ka heli kartaa warbixinta xiriirka ee xaffiiska kugu dhow websaydka RIKU.

Iyada oo loo marayo xafiiskeena waxaad sidoo kale qofweydiisan kartaa taageero, kaas oo aad la kulmi kartid oo aad ula hadleysid si qarsoodi ah. Qofka taageeraha waa u ku dhageysanayaa wuxuuna ku siinayaa talo waxkuool ah waxaad sidoo kale aadi kartaa saldhiga booliska ama maxkamadda.